

## OFFICIAL

Dadka degan  
33 Alfred Street  
WAQOYIGA (NORTH) MELBOURNE

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo qoraynaa in aan kula socodsiino halka ay marayaan howlihii Guryo Dhisida ee Homes Victoria iyo barnaamijka dib u dhiska saraha dhaadheer.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Taasi micnaheedu waxay tahay inay hada meel fiican noo marayaan dhisida aan 9 xaafadood uga dhiseyno guryo loogu talagalay dadka meesha degan hada iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba guryahaas oo noqon doona kuwo ka fiican, ka amni wanaagsan iyo kana raaxo badan guryihii hore.

Waxaan si joogto ah ula xiriiri doonaa dadka deggan dhismayaashan iyadoona laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028 aan si dhow ula shaqeyn doono qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri daboolaya baahiyahooda.

## Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

## In lagaa caawiyo guuritaanka

Waxaan hadda caawimaad siinaa adiga iyo tiro yar oo ah qoysas wali ku haray 33 Alfred Street, North Melbourne inta lagu guda jiro marxalada ugu dambeeya ee guuritaanka.

**Haddii aad hadda wali qorsheynayso inaad go'aan ka gaarto dalab guri oo lagu soo bandhigay**, waxaan kugu dhiirigelineynaa inaad kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ugu sheegto go'aankaaga sida ugu dhakhsaha badan.

**Haddii lagu soo bandhigay guri cusub**, aadana wali go'aamin maalinta aad guurayso, hadda ayaa la joogaa waqtigii aad nala wadaagi lahayd maalinta aad guurayso.

## Xasuusnoow

**Xuquuqda aad leedahay waxba iskama badelayaan.** Gurigaaga cusub waxaad weli kusii heli doontaa xuquuqdii iyo xaq-dhowrkii aad hore u lahayd oo kale sida uu dhigayo Sharciga Kiraystayaasha Residential Tenancies.

**Caawinta lagaa caawinayo guuritaanka.** Waxaan kuu diyaarin doonaa dad alaabta kuu rara, kaa caawiya inaad xirxirato kabacdina kuu kala furfura hadii loo baahdo, kuu diyaariya in wax kasta lagu soo xiro sida taleefanka, internetka iyo waraaqaha boostada oo lagu soo wareejiyo sidoo kalena bixiya dhammaan kharashaadka ku baxaya howlaha guuritaanka intii macquul ah. Waxaan sidoo kale kaa caawin doonaa in la tuuro wixii aadan u baahneyn inaad qaadata.

Mahadsanid

**Simon Newport**

Madaxa Fulinta  
ee Homes Victoria

28/01/2026